Magaca iyo lnb.cpr. (cpr. nr.) (label)

|   |
|---|
|   |

# [Caruurta]

## Ogalaanshaha in la isticmaali karo warbixinta caafimaadka iyo kaydinta waxyaabaha bayoolajiga ah ee cusbataalka Rigshospitalet ka qaado dadka buka

Waxaan jecelahay inaan kaydino baadhitaanada iyo saamiyada lagaaga qaad cusbitaalka, oo aanu ku kadino baanka baayoolajiga(biobank). Kaydka ayaa mustaqbalka loo isticmaalayaa baadhitaanada shaybaadhka ee nooca cudurkaaga, si loo iftiimiyo xidhiidhka cudurada hiddo ahaan loo dhaxlo, caabuqyada, deegaanka, qaab nololeedka, cuduradda kale iyo cudurka aad qabto. Sidoo kale waxaan jecelnaha, si aan si fiican oogu fahano natiijada shaybaadhka, waxaan rabnaa inaan isticmaalo warbixinta ku diiwaan gashan joornaalkaaaga caafimaadka ee cudurkaaga ama xaaladaada caafimaada. Ujeedadu waa in la horumariyo dawaynta dadka qaba cudurkaaga oo kale.

Dhammaan mashruucyada cilmibaadhista baanka bayoolajiga, waa inay ansixiyaan guddida cilmibaadhista iyo saynsika, loona gudbiyo Hayadda Agaasinka Xogta.
Warbixinta ku saabsan cudurkaaga (sida ku xusan  qaybta hore ee qoraalka), waxay qayb ka noqon sidoo kale waxyaabaha ay baadhayaan cilmi baadhayaasha. Warbixintan waxaa loo isticmaali doonaa, hab aan lagu muujinaynin aqoonsigaaga, oo aan cadaynaynin qofka aad tahay (hab qarsoodi ah).

---

Waxaan rabaa in la kaydiyo dhiigga iyo waxyaabaha kale ee baayoolijiga ah ee la iga qaado, oo dabadeed loo isticmaalo cilmi ahaan astaamaha iyo nooca cudurka aan qabo.

Haa ☐ Maya ☐

Haddaad dib ooga noqonayso ogolaanshaha ama aadan rabin inaad ka qay qaaadato, waa in rabitaankadan la diiwaan galiyo. Waa inaad buuxiso foom ”Unugyadaada doorashadaada/Dit væv, dit valg”, foomkan waxaa loo dirayaa guddoonka caafimaadka qaybta diwaangalinta unugyada jirka. Shaqaalaha cusbitaalka ayaa kaa caawin kara arintan.ka noqoshadana wax saamayn ah kuma yeelan doonta daawayntaada hadda iyo mida mustabalkaba.

Taariikh: ______________________ Saxeex: _____________________________

Ogolaanshaha waxa bixiyay:_____________________________________________

**Cadaynta la buuxiyay waxa loo dhiibayaa shaqaalaha cusbitaalka**

**Warbixin ku socota caruurta: Baadhitaan faa'iido u leh bukaanka mustaqbalka**

Waxaan ku waydiisanaynaa, inaad noo ogalaato kaydinta baadhitaanka lagugu sameeyay, si ay suurta gal noogu noqoto mustaqbalka inaan baadhno difaaca jidhka ee infakshanada ama caabuqa.

Waxaanu ka bilownay cusbitaalka  Rigshospitalet baanka baayoolijiga (en biobank), iyo saxaradabaankan oo ah qaboojiye ama friizar aad u wayn, oo aan ku kaydino dhiigaga, candhuufta iyo saxarada laga qaado bukaanka. Waxyaabahan waxaa loo isticmaalayaa mustaqbalka mashaariicda cilmi baadhista, si aanu u ogaano wax badan oo ku saabsa bukaaanka, kuwaasoo khatar ugu jira inuu ku dhaco infakshan ama caabuq khatar ah, ama kuwa  uu ku dhacayba infakshan ama caabuq khatar ah.

Baadhitaanadan la aruuriyay waxaa lagu baadhaa shaybaadh. Halkan siddo kale waxaa lagu baaraa waxyaaba ku tacaluq bukaanka(jiinkiisa, borotiinka iyo hormoonada) iyo haddii ay jiraan bakteeriya ama faayris ku waxyaabaha laga qaaday bukaaanka. Waxaaan rajaynaynaa inaan helo aqoon badan oo la xdhiidha difaaca jidhka iyo infakshanada. Macluumaadkan cusub ee shaybaadhka lagu helo, ayaa waxaa lala kaashanayaa warbixinta caafimaad ee ku diiwaan gashan joornaalka caafimaadka, si natiijada baaditaanka loogu tarjumo sida oogu fiican.

Siddaa daraadeed waxyaabaha baayoolijiga aha ee  ugu deeqayso baanka baayoolajiga ee  PERSIMUNE, waxay u leedaay faa'iido wayn bukaanka mustaqbalka, iyo siddi loo hormarin lahaan habkii loo baadhi lahaa. Laakiin ka qayb qaadashada aad ka qayb qaadanayso baanka baayoolijiga xidhiidh wayn lama laho daawaynta ilmahaaga.

Dhiigaga uu qaado baanka baayoolijiga(biobank) waxaa lal qaadaa dhiigaga kale ee lagaa qaado marka lagu baarayo, oo lama isticmaalo wax kale.  Dhiiga waxaa lagu qaadaa saddex silinge ama dhalooyinka dhiiga lagu qaado (2 x 9 ml og 1 x 3 ml), dhiigan yar ee lagaa qaadayo wax dhib ah ah kuma laha caafimaadka jirkaaga

Baadhitaanka dhiiga – candhuufta- iyo saxarada - waxaa la qaadaa marka ogalaanshaha la bixiyo, mar labaad waxaa la qaadaa  3-6 bilood ka dib,  haddana sannad ka dib, iyo inta ay daawayntu kaaga socoto cusbitaalka Rigshospitalet.

Baadhitaanada shaybaadhka waxay ka dhacdaa cusbataalka Rigshospitalet ama xarumaha dalalka EU-da ee aannu wadashaqaynta leenahay.

Macluumaadkaaga shaqsiga ah si buuxda ayaa loo xafidayaa waana la qarinayaa. Ka hor inta aan walxaha baanka loo gudbin mashruucyada cilmibaadhista, waa inay soo ansixiyan Golaha Cilmibaadhista iyo Hayadda Agaasinka caafimaadka.

Adiga ayaa ikhtiyaar u leh, inaad ogalaaato  ka qaybqaadashada ilmahaaga, goaankaaguna wax saamayn ah ku yeelan maayo dawayntaada mustaqbalka. Haddaad ogolaato inaad ka qayb qaato,  oo aad ka dib  is bedesho waxaa lagaa codsanayaa inaad ka diiwaan galiso rabitaankaada halka lagu diiwaan galiyo isticmaalka unugyada.  Waxa aad buxuinaysaa foomka "Unugyada, doorashadaada/**Dit væv, dit valg**", markaas ayaad u diraysaa Diiwaanka Isticmaalka unugyada (Vævsanvendelsesregisteret) oo hoos yimaadda Hayadda Agaasinka Caafimaadka (Sundhedsstyrelsen). Haddaad u baahato caawimo la xidhiidh shaqaalaha kilinigga ama xarunta.

*Mahadsanid,* waqtiga aad ku akhriday macluumaadka la xidhiidha baanka bayoolajiga.

Haddii aad ka qayb qaadanayso, waxaanu kaa codsanaynaa, inaad noo ogolaato, inaanu saamiga lagaa qaado ku kaydino baanka bayoolajiga, PERSIMUNE, adigoo buuxinaya oo saxeexaya foomka bogga gadaale (**Ogalaanshaha in la isticmaali karo warbixinta caafimaadka iyo kaydinta waxyaabaha bayoolajiga ah ee cusbataalka)**

Salaan Wacan,
Shaqaalaha PERSIMUNE

Wararka khuseeya PERSIMUNE waxa laga la xidhiidhi karaa CHIP, kilinigga dawaynta caabaqa. Qaybta 2100, Rigshospitalet, Blegdamsvej 9, 2100 København Ø.Tilifon.: 35455757 (xilliga furitaanka 9-15 saac).
E-mail: persimune.rigshospitalet@regionh.dk 24. november 2015